

Tilmaanbixinno loogu talagalay qofka karaantiilay

Maxaa loola jeedaa karaantiilka ama goonni ku haynta?

Si loo xaddido fiditaanka faryruska Korona ayaa waxaa karaantiil la geliyay dadka cudurka u dagan in ay qaadaan. Hawlaha karaantiilka waxaa la iskula dayayaa in lagu gooyo silsiladda kala qaadista cudurkan iyo in la gaabiyoo xawaaraha cudurkan safmarka ah ee Finland.

Sida uu qabo sharciga cudurada faafa (1227/2016), dhakhtarka degmada ama laanta daryeelka caafimaadka u qaabilsan cudurada faafa ayaa qofka u qori kara karaantiilka, kaas oo lagu caddeeyay ama ama looga shakiyay in uu u dagan yahay qaadista cudur faafa oo khatar guud leh.

Markasta guriga miyaa karaantiilista lagu hirgelin karaa?

Inta badan karaantiilista guriga ayaa lagu hirgelin karaa. Haddii ay guriga deggan yihiin dad ka weyn 60 sano ama dadka qaba cudurada aasaasiga ah, waxaa laga fekeri karaa in qabanqaabo gaar ah dadkaas loo sameeyo. Tan waxaa keenaya, in qofka karaantiilka ku jira uu jirran karo kaddibna uu cudurka ku qabadasiin karo dadka kale kahor inta aan daaweynta la doonan. Cudurka uu fayruska Korona sababo wuxuu halis weyn ku noqon karaa dadka da'da ah iyo dadka qaba cudurada aasaasiga ah.

Qofka karaantiilka ku jiraa bannaanka ma tegi dukaamadase ma aadi karyaa?

Qofka karaantiilka ku jira waa in uu iska ilaaliyaa wax xiriir taabasho ah in uu la yeesho dadka qoyskiisa ka baxsan. Bannaanka wuu aadi karaa, haddii uusan xiriir taabasho la yeelaneyn dadka kale. Ma ahan in la aado tusaale ahaan shaqada, dugsiga, xannaano-maalmeedka, hiwaayadaha ama dukaanka, sababtoo ah waa adagtahay in aan la istaabay marka goobahan la joogo.

Waa maxay sababta aan loo karaantiileyn asxaabta u dhow dadka cudurka u dagan?

Karaantiil kuma jiraan asxaabta ama ehelku, sababtoo ah wax xiriir taabasho ah lama laheyn qof qaaday cudurka, marka laga reebo qofka la karaantiilay. Ehelka ama asxaabta qofka la karaantiilay ee calaamadaha cudurka laheyn ma ahan kuwa cudur laga qaadayo.

Haddii qof cudurka u dagan ay calaamado ka soo baxaan, waxaa la baarayaa in uu qaaday fayruska Korona iyo in kale. Iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka baaritaanka ka soo baxa ayaa haddii loo baahdo karaantiilista lagu soo darayaa ehelka. Ehelka aan calaamadaha cudurka laheyn ma qaadsiinayaan dadka kale.

Sidee ayeey dugsiga u dhiganayaan dadka karaantiilka guriga ku jira?

Haddii uu cunuggu ku jiro karaantiilka guriga, dugsiga ayaa siinaya hagitaannada ku saabsan sida waxbarashada loo qabanqaabinayo.

Sidee ayaa loo magdhabayaa mushaarka la waayo wakhti karaantiilka lagu jiro?

Lacag maalmeedka cudurada faafa ayaa magdhabaya mushaarka la waayay, haddii lagu qoray in aad ka maqnaato shaqada, lagu karaantiilo ama meel gooni ah laguugu haayo si looga

hortago fidista cudurka faafa. Waad heli kartaa lacag maalmeedka cudurada faafa, xittaa haddii aadan aheyn mid aan shaqo awoodin. Haddii mas'uul ka tahay cunug 16 sano kayar waxaad heli kartaa lacag maalmeedka cudurada faafa, haddii cunuggaada loo qoray in uu guriga joogo cudur faafa dartiis, sidaas darteedna aadan shaqo aadin karin.

Dadka karaantiilka la geliyay waxaa boosta loogu dirayaa go'aanka rasmiga ah ee lagu karaantiilay, go'aankaas oo Kelada loga codsan karo lacag maalmeedka cudurada faafa.

Macluumaadka dheeraad ah ee lacag maalmeedka cudurada faafa waxaa laga helaa (Hay'adda hawlgabka qaranka)

Maxaa la sameynayaa haddii qofka karaantiilka ku jira ay calaamadaha cudurka ka soo baxaan?

Waa in lala socdaa sida horumarka ay calaamadaha cudurka ee qofka karaantiilka ku jira.

Haddii qofka karaantiilka ku jira ee cudurka u dagan lagu arko mid kamid ah calaamadaha caabuqa neefmareenka ee soo socda (xummad, dhuun xanuun, duray, neefta oo adkaata), waa in la wacaa lambarka telefoonka talabixinta magaalada Helsinki, tel. 09 310 10024 (Isniin-Jimco saacadda 7–16). Wakhtiyada kuwan ka baxsan waxaa dadka calaamadaha cudurka qaba haddii loo baahdo talo siinaya Caawimaadda Heeganka HUS, tel. 116117. Xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ayaa iyagoo ku saleynaya qiimeynta halista ee saami kasta oo la qaaday waxay u kiiska kasta u qiimeynayaan goonidiisa.

Yaa la weydiinayaa su'aalaha karaantiilka la xiriira?

Su'aalaha karaantiilka la xiriira waxaa laga xiriiri karaa waaxda shawlaha cudurada faafa ee magaalada Helsinki, tel. 09 310 51222, maalmaha shaqada Isniin- Jimco saacadda 9 – 15.

Fiiiri sidoo kale

Wararka Korona ee magaalada Helsinki